



Kooraska macmiisha kaamka ee ka faaloonaya bulshada wadanka Finland

Kooraskani macmiilsha kaamka, waxa uu u sharxayaa ariimaha muhiimka ah ee aasaasiga ah ee ku saabsan bulshada wadanka, sharcigooda, taariikhdooda iyo qaab dhaqankooda bulsheed.



Waajibka ka qayb-galka kooraska

Qof kasta oo kaamka macmiil ka ah waxa ku waajib ah in uu kooraskan ka gudbo, sameeyo casharada kooraska ee iskaa-wax-isu baridda iyo kuwa shabakadda internetka. Sidoo kale macmiisha ay waajibka ku tahay ka qayb galka waxqabadka shaqada iyo waxbarashada kaamka, iyaga waxa loo diyaarin doonaa koorasyo goobjoog ah.

Akhriyo macluumaadka iskaa-wax-isu baridda ah

Qof kasta oo kaamkan macmiil ka ah waa in uu akhriyo macluumaadka iskaa-wax-isu baridda. Macluumaadkaas oo ah 13 luuqadood oo kala duwan oo ku jira bogga internetka ee xasiiska Amagraashinka: migri.fi/suomalaisen-yhteiskunnan-kurssi.

Macluumaadka iskaa-wax-isu baridda iyo sida bogga internetka looga helayo, waxa kaa caawinaya xarunta Kaamka. Sidoo kale xarunta Kaamka waxa aad ka kodsan kartaa in ay kuu koobiyeyso macluumaadka iskaa-wax-isu baridda.

Samee kooraska shabakadda internetka

Qof kasta oo kaamka macmiil ka ah, waxa ku waajib ah in uu sameeyo kooraska shabakadda internetka. Kaamka ayaa ku hagaya oo ku siinaya koodh-lambarka aad ku galayso kagana shaqaynayso kooraska shabakadda internetka. Haddii aad u baahato, kooraska waxa aad ku samayn kartaa kumbuyuurka kaamka, tableedka ama tilfoonka.

Ka qayb gal casharada goobjoog ah

Macmiisha ay ku waajibtay ka qayb-galka shaqadda iyo waxbarashadda kaamka, waxa loo diyaarinayaa casharo goobjoog ah oo ka mid noqon doona shaqada iyo waxbarashadda Kaamka. Casharadaas goobjoog ahi waxay ku saabsanaan doonaan mowduucyo kale.

Waa lala socon doonaa waxbarashada kooraska

Xarumaha Kaamka iyo xarunta Amagreeshinkuba way la socon doonaan qaabka kooraska loo samaynayo. Qofka macmiisha ah macluumaadkiisa macmiileed ayaa lagu qori doonaa in la oggaysiiyey kooraska iyo macluumaadka iskaa-wax-isu baridda iyo in qofku sameeyey kooraska shabakadda internetka iyo in uu ka qayb galay casharada goobjoog ah.